

**Sharciga 31 Oktobar 1956 lamba. 12**

**Wax ka baddalka sharciga ugarsiga Soomaaliya**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkya qoraalka meelmarinta Golaha Xeer-dejinta;

**WUXUU OGGOLAADAY OO ANSIXINAYAA**

Xeerka soo socda;

**Qod. 1**

Waxaa la meelmariyay wax ka baddalka soo socda ee Sharciga ugaarsiga Soomaaliya, ee lagu meelmariyay Amarka 6 Dicember 1951, lamba. 26;

a) LIFAAQA A)

waxaa laagu kordhiyay: 3 – Xamaartada

lamba. 55 – Yaxaaska – Crocodilus niloticus – Yaxaas

b) LIFAAQA B)

waxaa lagu kordhiyay: qaybta II: Yaxaaska lamba. 10

qaybta III: Yaxaaska lamba. 5

c) LIFAAQA C):

waxaa lagu kordhiyay: hal yaxaas oo ka baxsan tirada la oggolyahay

2. xuquqda dheeraadka ee dilka ugaarta

Waxaa lagu kordhiyay hal yaxaas oo ka badan tirada loo oggolyahay talyaaniga haysta fasaxa ugaarsiga nooca A, B iyo D: Sh. So. 5,--.

3. — xuquuqda qabsashda:

waxaa lagu kordhiyay hal yaxaas Sh. So 2,--.

4. — Canshuurta dhoofka xayawaanka nool:

waxaa lagu kordhiyay: xamaaratada - Yaxaaska Sh. So. 10,--.

d) Qodobka 46

Waxaa loo baddalay sidaan:

Haragga Shabeelka, Haramcaska iyo Yaxaaska ay dileen kuwa haysta shatiga ugaarsiga , waa in ay keenaan xaafiiska Degmaada ugu dhow si loo buufiyo, kadib marka uu bixiyo canshuur go'an oo ah Sh. So. 5 harag kasta.

**Qod. 2**

Xerkaan waxaa lagu darayaar ururinta rasmiga ee xeerarka waxaana lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga. Cidkastana wuxu waajibinayaa in ay u hoggaansatoka xeer Soomalia ahaan.

Maariikhda Muqdisho, 31 Oktoobar 1956.

Maamuaha

**P. Franco**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Xaaji Faarax Cali Cumar**